



# **Wax ka Baro Ikhtiyaarada Ardaygaaga K-5 ee Dhacdada Maqal iyo Muuqaalka ee Febraayo 18 laga bilaabo 6-8 g.d.**

**Febraayo 12, 2021**

Qoysaska Sharafta leh ee PPS,

Waxaan rabnaa inaan kugu casuunno inaad nagala soo qaybgasho dhacdo macluumaa oo loogu talagalay qoysaska ardayda ku jiri doona fasalada K-5 sanad dugsiyeedka 2021-22.

## **Ayaa kaqaybgalaya?**

Waanu ku soo dhawaynaynaa dhammaan qoysaska dhacdadan. PPS waxay u qaban doontaa dhacdo maqal iyo muuqaal ah oo la dhaho Sahami Ikhtiyaaradaada maalinta Khamiista, Febraayo 18 laga bilaabo 6-8 g.d., qoysaska ardayda K-5 ee xiisaynaya ikhtiyaarada diirad-saarka mawduuceed, dugsiyada badiilka ah iyo kuwa caqdiga, iyo barnaamijyada labada luqadood wax lagu barto.

## **Ku saabsan dhacdadan**

Waxaa jiri doona fadhi guud oo lagu baranayo ku xirnaanshaha dugsiga xaafaddaada iyo dalbashada baddalka, waxaana ku xigi doona saddex fursadood oo si qoto dheer loogu sahamin qolalka goonida ah ee dugsiga. Galaangal u yeelashada dhammaan qaybaha dhacdada waxa loo marayaa hal xiriiriye kulan: <https://pps-net.zoom.us/j/89619150632>.

## **Turjumaano ayaa la heli doonaa**

Kalfadhiga guud iyo qolalka goonida ah ee barnaamijka labada luuqadood waxaa lagu heli doonaa luuqado badan, tarjumaadna waxaa lagu heli doonaa Isbaanish, Fiitnaam, Soomaali, Ruush, Kaantoniis, Mandarin iyo Luuqadda Dhagoolayaasha Ameerikaanka.

Baro wax badan oo ku saabsan ikhtiyaarada K-5, oo ay ku jiraan tilmaamaha dheeraadka ah ee dhacdada Febraayo 18 halkan [pps.net/k-5options](https://pps.net/k-5options).